

Dayac tirka Wadooyinkeena (Fixing Our Streets): 2020-2024



**10 SENTI OO QASACA KU RIDO =
\$75m OO LAGU BIXINAAYO:**

**DAYACTIRKA MARINKA IYO
GODADKA WADADA**

SAFE ROUTES TO SCHOOL

MARINADA GEESKA WADADA OO LA BADSHO

**CALAAMADAHA WADOOYINKA IYO
NALALKA WADOOYINKA**

MARINO BAASKIIL OO FIICAN

Waa maxay Fixing Our Streets?

Bisha Maayo 2016, cod bixiyaasha Portland ayaa kalsoonidooda siiyay Portland Bureau of Transportation (PBOT, Waaxda Gaadiidka ee Portland) markay ansixiyeen Xeerka 26-173, oo ah canshuur cusub oo 10 senti looga qaadaayo gaaska si loogu dayac tiro wadooyinka loogana dhigo goobo amaan ah. Ishaan ayaa ahayd ishi ugu horaysay ee maalgalin maxali ah lagu bixiyo taariikhda magaalada taasoo si gaar ah loogu qoondeeyay baahiyaha gaadiidka ee magaalada. Isla bishaas, Golaha Deegaanka ee Magaalada Portland ayaa an sixiyay canshuur la saaray shirkadaha adeegsada gaadiidka waawayn ee ku shaqeeya gaariyaasha xamuulka ee ka culus 13 ka tan, si ay shirkadu u dhiibaan doorka saxda ah ee uga aadan dayac tirka wadooyinka, sidoo kale.

Ayadoo la adeegsanaaya astaanta mashruuca “Fixing Our Streets”—PBOT waxay maaraysaa mashruuc kasta oo lagu qarash gareeyo canshuurahaan waxayna ka shaqaynaysa inay adeeg siiso Portland. Inkastoo maaliyada Fixing Our Streets ay ka kooban yihiin wax ka yar 5% dakhliga sanad laha ah ee PBOT, lacagtaan waxay u sahlaysaa PBOT inay ka faa'iidaystaan maal gashiyadooda ayna boobsiiso shaqada ay horay u waday si loo dhawro nidamaka gaadiidka oo amaan iyo kalsooni leh oo qof kasta helo. Arintaan ayaa si gaar ah muhiim u ah maadaama aan dhisayno magaalo kobcaysa.

Higsiga: In lasii xoojiyo guusha la wada arkay ee mashruuca Fixing Our Streets iyo in la raadsho dakhli dheeri ah oo dhan \$74.5 milyan oo diirada lagu saaraayo maal gashi ku aadan dariiqyada, astaamaha wadooyinka, marinada geeska wada, nalalka jidadka, iyo sidoo kale galitaanka fiican ee amaanka leh ee dugsiyada, astaanada gaadiidka, iyo adeegyada bulshada ee dhalaanka, duqoowda, iyo qoysaska reer Portland. Qarash garaynta dakhliga kasoo xarooda barnaamijka waxaa kormeeraaya Gduiga Kormeerka mashruuca Dayac tirka Wadooyinkeena (Fixing Our Streets Oversight Committee) ayagoo wakiil ka ah bulshooyinka badan ee doorka ku leh wadooyinka iyo jidadka Portland.

Xog dheeri ah ka fiiri www.fixingourstreets.com

Qalabka: Cusboonaysiinta canshuurta 10 senti ee gaaska ee ku muel gaarka ah oo dhamaanaysa afar sano kadib. Cod bixiyaashu waxay fursad u heli doonaan inay u codeeyaan soo cusboonaysiinta Barnaamijka Dayac tirka Wadada iyo Kor u qaadista Amaanka inta lagu jiro doorashada Maayo 2020.

Maxaa ku jira mashruuca?

Wadooyin Siman:

- \$25M oo lagu bixinaayo marinada ayadoo diirada la saaraayo ilaalinta ka hortaga ah ee wadooyinka basaska iyo xaafadaha

Wadooyin Badbaado leh:

- \$5M ayaa lagu bixinayaa dhisida calaamadaha wadada iyo astaamaha lagu xiraayo qaar kamid ah wadooyinka ugu khatarta badan Portland
- \$4.5M ayaa lagu qarash garaynayaa marinada geesaha wadada iyo meelaha kale ee lagu lugeeyo ayadoo la adeegsanaayo PedPDX: Qorshaha Portland ee Marinada Dadka Lugaynaaya ee Magaalada oo dhan (Portland's Citywide Pedestrian Master Plan) oo ah tusmadeena maal gashiga
- \$6M ayaa lagu qarash garaynaa mashruucyada Wadooyinka Amaanka ah ee Dugsiyada gala (Safe Routes to School) si gacan looga gaysto xaqiijinta socdaalka lugta iyo baaskiilka lagu tagaayo dugsiga arin u suuroobaysa dhammaan ardayda dugsiyada Hoose ee Portland.
- \$4.5M ayaa lagu bixinayaa nalalka wadooyinka ee Wadooyinka Inta Badan Isku dhacyada Gadiidka ka dhacaan (High Crash Streets) si kor loogu qaado aragtida qof kasta, ayadoon laga eegayn qaabka ay ku socdaalayaan
- \$4.5M ayaa lagu bixinaa Wadooyinka Cagaaran ee Xaafadaha (Neighborhood Greenways) si loo balaarsho marinada wadooyinka xaafadaha la dagan yahay ee isku xira dugsiyada iyo jardiinooyinka, ayagoo la siinaayo meelo loo maro ganacsiyada iyo astaanada basaska
- \$1.5M ayaa lagu bixinayaa Kor u qaadista Amaanka Xaafadaha (Neighborhood Safety Improvements) si loo fuliyo mashaariicda amaanka ee kookooban oo diirada lagu saaraayo dadka lugaynaaya iyo dadka baaskiilka kaxaysto

Adeegyada Gaadiidka ee Bulshada:

Ilaalinta Aasaasiga ah:

PBOT waxay marar badan ka maqashay dadka xaafadaha iyo ganacsiyada ee naga doonaayo inaan si dhakhso ah uga jawaabno codsiyada hagaajinta wadooyinka sida dayactirka godadka biyaha, dayactirka meelaha wada kamid ah ee jajaba (dayactirka salka) iyo hagaajinta wadooyinka jaayga ah.

- \$4M ayaa lagu bixinayaa dayactirka salka wadada (dayac tirka meelaha wada ee xumaada) magaalada oo dhan
- \$4M ayaa lagu bixinayaa hagaajinta wadooyinka jaayga ah ee Portland
- \$5M ayaa lagu bixinayaa shaqaalaha godadka wadada u xilsaaran, oo sanadkii dhan la sameeyo

Hormarada Aasaasiga ee Badbaadada:

Xog dheeri ah ka fiiri www.fixingourstreets.com

PBOT waxay leedahay farsamooyin kala duwan oo la isku raacay si ay si wayn ugu hormariso badbaadada wadada. Abuurista barnaamijka magaalada oo dhan ee adeegyada badbaadada wadada ayaa u sahlaaya PBOT inay bixiso adeegyadaan si dhakhso ah oo waxtar leh.

- **\$2M oo lagu bixinayo yaraynta xawaaraha ee wadooyinka dhamaada**
- **\$4M oo lagu bixinaayo kobcinada dheeriga ah ee badbaadada**
- **\$2.5M oo lagu bixinaayo Casriyaynta Mashruuca Neighborhood Greenway**
- **\$2M oo lagu bixinaayo isgoysyo amaan ah**